


Soo gal adigoo isticmaalaaya Freja eID Plus

Haddii aan lagu siinin BankID, ama haddii aanad awoodin ama aanad rabin inaad mid sameysato, ayaa laga yabaa inaad taas bedelkeeda Freja eID Plus ku soo gadho 1177.se. Freja eID Plus waa mid bilaash ah, moobaylka soo mareysa, oo nooc ka mid ah Aqoonsiyada elektiroonigga ah ee Iswiidhishka. Freja eID Plus waxa marka hore la heli karaa markaad app-ka kula soo degto moobaylkaaga ama tabletka. Waxa aad markaa kadibna booqan doontaa mid ka mid ah wakiilada ATG ga si aad uga hawlgaliso/shaqeysiiso Aqoonsiga elektaroniga ah heerka Plus gaarsiisan.


Ma jiro wax xad da'da ah oo loogu talagalay Freja eID Plus. Hase yeeshee, haddii aad 18 sanno jir ka yar tahay waa inaad ogolaansho waalidkaaga/mas'uulka sharciga ah ka haysataa.



Sida loo soo galo aad 1177.se

Sida loo soo galo 1177.se

Si aad 1177.se ugu soo gasho, waa inaad ka diiwaan gashan tahay diiwaanka dadweynaha ee dalka Iswiidhan. Waxa aad sidoo kale u baahan doontaa Aqoonsi elektrooniga ah ee Iswiidhishka. Aad 1177 bogga internetka ee Hagaha Daryeelka Caafimaadka, 1177.se, oo soo gal.



Haddii aad 13 sanno jir ka yar tahay waa in waalidkaa/mas'uulkaaga sharciga ahi uu koontadaada soo gallo isagoo isticmaalaaya adeega wakiilka.

Haddii aad 13 ka weyn tahay waxaad soo geli kartaa adigoo isticmaalaaya BankID.

Waa maxay BankID?

BankID waa aqoonsi elektaroonig ah kaas oo loo isticmaalo in lagu xaqiijiyo aqoonsigaaga marka internetka la isticmaalayo. Waxa ay ka kooban tahay app amaan ah/sugan iyo aqoonsi elektaroonig ah.

Waxaad aqoonsi elektarooniga ku rakiban kartaa adigoo adigoo bangigaaga internetka isticmaalaaya ama toos uga soo galaaya bogga internetka, install.bankid.com. Wax dheeraad ah ka ogow bankid.com.

Waa maxay BankID ee moobaylku?

BankID ee moobaylka waa BankID aad ku haysan karto telefoonkaaga ama tablet-kaaga si aad had iyo jeer ugu sidato. Uma baahnid inaad wax barnaamij ah ku rakibto kombiyuutarkaaga.

Miyuu qof kastaa yeelan karaa BankID?

Waxa aad ubaahantahay inaad haysato nambarka shakhsiga ee Iswiidhishka. Da'da la iska rabaa waa ay kala duduwan tahay bangiyada kala duduwan maadaama oo ay bangiyadu iyagu kaligood go'aaminayaan arrintaas. Bangiyada badankood waxay aqoonsi elektaroonig ah siiyaan dadka da'doodu tahay laga bilaabo 13 sanno jir ilaa 18 sanno jir. Haddii aad 18 sanno jir ka yar tahay waa in waalidkaa/mas'uulkaaga sharciga ahi waa inuu aqoonsiga ansixiyaa. Waxa loo yaqaano 'säkerhets-BankID' ('Amaanka BankID') kuma filna.

Diiwaankaaga caafimaadka ka akhri internetka

Haddii aad 16 sanno jir tahay ama aad ka weyn tahay waxaad diiwaankaaga caafimaadka ka aqrisan kartaa adigoo soo galaaya 1177.se. Nooc ka mid ah aqoonsi elektaroonig ah ayaa la iskaga baahan doonaa. Qadarka macluumaadka ee la soo bandhigay/muujiyey waxa uu ku xiran yahay gobolka lagugu daaweeyey.

Loogu talagalay waalidiinta/mas'uulka sharciga ee leh ilmo ka yar 13 sanno jir

Waxa aad maareyn kartaa arrimaha daryeelka caafimaadka ee ilmahaaga adigoo isticmaalaaya 1177 adeegada internetka ee Hagaha Daryeelka Caafimaadka. Waxa la sameynaayo:

1. Ka bilow adigoo soo galaaya.
2. Guji 'Lägg till barn' (Ku dar Ilme). Kadibna gali lambarka aqoonsiga ee ilmaha.
3. Guji magaca ilmaha. Guji nambarka aqoonsiga shakhsiga haddii ilmahaagu aanu wali haysan magac.
4. Waxa aad hadda maareyn kartaa arrimaha daryeelka caafimaadka ee ilmahaaga.

Haddii aad ka diiwaangashan tahay Hay'ada Canshuuraha Iswiidhan (Skatteverket) waalid/mas'uul sharci ahaaneed ee ilme ka yar 13 sanno jir, waxaad akhrisan kartaa diiwaankiisa caafimaad adigoo soo galaaya adiga diiwaankaaga oo kadibna u beddelaaya diiwaanka ilmaha.